

Meherka iyo isguursiga Wadankaan Swisska

Wargelin ku Socoto Waalidiinta



Ma waxaad tahay qof ka walaacsan mustaqbalka ilmihiiisa?
Qofka uu guursandoono ama ay guursandoonto?

- Halkaan waxaad ka heli kartaa macluamad kusaabsan guurka,iyo guurka Switzerland.

Sharciga Swisska arimahan ku sabsan

Waaridku waa ay ku kala dugan yihiin sida ay nolosha caruurtoodu lagoonayaan ama ahaan doonto, sharciyada khuseeya guurka Switzerland waa in la dhawraa, sida kuwa hoos ku xusan:

- Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu iskiis u go'aansado goorta iyo cidda ay is guursandoonan.
- Guurku waa in uu noqdaa mid ka madaxbanaan qasab haddi kale wuxuu noqon doonaa mid aan la aqoonsan.
- Qofna si qasab ah looguma guurinkaro, cidii lagu helo falkaan waa 5 sano oo xarig ah.
- Guurka ciyaalka aan qaan gaarin looma dulqaadanayo xitaa haddi uu kadhaco dibada Switzerland.
- Guurka qasabka ah ama guurka ciyaalka aan qaangaarka ahayn, la iskuma keenayo qoys ahaan wadankan Switzerland.
- Waa ay xaquuq simanyihiin ragga iyo dumarkaba meelkasta ee wadankan.
- Haweenaydu waxaa ay xaquuq uleedahay in ay iska furto ninkeeda, ninkuna si lamid ah buu xaquuq uleeyahay.

«Muhiimada ugu weyn wiilashayda waa in ay jacyl uguursadan.»

(Davide, 45, Sicily)

«Kama soo horjeedi guurka dhaqanka ah, laakin waxaan ka biyadiidanahay guurka qasabka ah.»

(Şehriban, 36, Turki)

Ku: waalidkaygii aan jeclaa

Aad bay ugu adagtahay inaan warqadan idiin soogoro iyadoo iminka waqti badan ay ka soowareegtay kala magnanteena. Aad baan uga xumahay oo habeenadi maseexdi. Waan ogahay inaad maalin-kasta iga fikirtaan, laga yaabee idinkoo ii caraysan ama niyad jaban ama wal walsan. Waan ogahay inaad wax fican ila rabtiin ana aad baan idiin jeclahay, laakin ma guursan kari nin aanan jeclayn.

Fadlan ha iga xumaanina, ha ii caroonina waa isoo koriseen ilaa aan ka waynaaday. Hadda laakin waa inaan anigu mustaq-bal kayga dhisto waana wax aad malaha la yaaban tihiin laakin maalin maalmaha ka mid ah ayaad ku farxi doontaan sidaan isku dhisidoono. Tan waan idiin balan qaadayaa waxaan rajeenayaa iyadoon jirin caloolxumo in aan farxad isku aragno mar ay noqotoba. Haddi ay aniga taladayda ahaan lahayd hadadan baan jeclaan lahaa in aan isku soo noqono.

Ka: Inantiinii idin jeclayd

«Gabdahayga ayaga iskooda u doortaan, tani waa ii muhiim aniga.»

(Hassan, 59, Irani)

Talo

Wixii macluumaad dheeraad ah ama wada hadalka fududayn ah, fadlan ka xiriir ciwanada hoos ku xusan:

Xarumaha talasiinta

- www.zwangsheirat.ch, Tel: 021 540 00 00
info@zwangsheirat.ch
- Basel-Stadt: GGG Ausländerberatung
Tel: 061 206 92 22, www.ggg-ab.ch
- Baselland: Ausländerdienst / ald
Tel: 061 827 99 00, www.ald-bl.ch
- Beratungsstelle für binationale Paare und Familien
Tel: 061 271 33 49, www.binational-bs.ch
- Opferhilfe beider Basel, Tel: 061 205 09 10
www.opferhilfe-beiderbasel.ch

Xarumaha latalinta Qoyska

- Basel-Stadt: Familien- Paar- und Erziehungsberatung
Tel: 061 686 68 68, www.fabe.ch
- Baselland: Cinwaanada waxaa laga heli karaa halkan hoos www.fejb.ch

Haddii xaalad degdeg ah

- Polizeinotruf Tel: 117, www.polizei.ch